Somaliska
Integration

Midaynta bulshooyinka

17ka sebteembar oo ku aadan maalinta doorashada, waxaa go'aan laga gaari doona mustaqbilka dalka Iswiidan, xilkaasuna wuxuu saaran yahay adiga iyo aniga ba. Dhammaanteenna waxaa dusha naga saaran isla xilkaas. Codkaaga iyo kayga waa isku qiimmo. Haddaba miyaan kor u qaadna horumarka heerka sare ah, mise hoos ayaan u dhigna, anagoo karoonka shanaad ee canshuurta ka saarno khasnadda aanu wadajirka u leenahay? Miyaan horumarinaa hab-noleedka dalka Iswiidan – mise dusha ayaan u dhignaa?

Dumarka iyo ragga ba dhammaantood waxay lee yihiin isku xuquuq, waajibaad iyo isku fursad, iyadoo aanan la tixgelin jinsiyadooda, diintooda ama dhaqamada ay ka yimaadeen. Haddii aanu nahay xisbiga socialdemokratiga waxaanu doonaynaa in aanu dhisno dalkayga Iswiidan, anago adeegsanayno saldhigga kala duwanaashada. Waxaa wadijirka lagu dhisi doona, iyadoo la adeegsanaay ixtiraaam u muujinta kala duwanaanshada ee labada dhinac ku salaysan, kuwaso iyag-na waafaqsan saldhigga qiimeynta dimoqratiyada ku salaysan. Dadweynaha dhammaantood waa in ay dareemaan wadajir iyo masuuliyad.

Dalka Iswiidan maanta waxaa ku nool ummad dalal kala duwan ka yimi. Waxay horumariyan dalka, saamayn wanaagsan way ku yeeshaan, midaynta bulshooyinka iyo kala duwanaanashada waxay haystaan taageero xoog leh. Haseyeeshe, waxaa jiraan taxadiyo waawayn. Iswiidishka asalkooda shisheeye ah waxay weli la kulmaan iska naceeb aanan sabab lahayn iyo kala-soocid. Tirada shaqolaaweyada iswiidishka asalkooda ka yimi dalal shisheeye ah wey sareeysa. Taaso ah xaqdarroo oo marna la oggolaan karin. Haddii aanu nahay xisbiga socialdemokratiga, waxaaa sidaas darteed u qaadanay tilaabooyin wax looga qabto, loogu-na hagaajiyo midaynta bulshooyinka, lagu ciribtiro kala sooca, korna loogu qaado fursada shaqohelida. Arrimmo badan ayaa la hagaajiyay. Laakinse kuma filna, waxaa weli haray hawllo badan.

Haddii aad u baahan tahay warbixin dheeraad ah mise aad dooneeyso inaad xubin ka noqoto xisbig aocialdemokratiga, booqo hoyga Internetka ee socialdemokratigana.se mise wac taleefanka 08-700 27 27

Shaqada waa saldhigga midaynta bulshooyinka
Shaqada waa saldhigga midaynta bulshooyinka iyo helida dhaqaalaha wanaagsan. Shaqada waxay muhim weyn u tahay aadenaha awood ku yeelan lahaa noloshiisa. Higashada laga lee yahay qofka dalka Iswiidan la siiyay sharciga waa heer sare, taaso ah innuu dhaqsi barto luqada iswiidishka, kadibna shaqo helo. Siiba waxaan doonayna inaan sii hagaajinno midaynta bulshooyinka, anagoo abuurna fursadaha shaqo helida oina kordhino horumarka dhaqaaleed ee wanaagsan.

Waxaan qaadanay tilaabooyin wax looga qabto sidii loo kordhin lahaa shaqohelida ee ku saabsan iswiidishka dalalka dibeda ku dhashay ee ku nool dalka Iswiidan, tan iyo 1994[kii] waxaa sare u kacay tirada dadyoowga dalalka dibeda ku dhashay ee shaqo dalka ka helay, tirokoobkaas oo lagu qiyaasay boqolkiiba lex. Laakin waa tiro aanan nagu filnayn. Tirada sare ee dadyoowga dalalka dibeda ku dhashay ee shaqo la'aanta ah, waxay ka hortimaada fursad u qofku ku heli lahaa masuuliyad uu isku masruufo, waxaa kaloo ka lummaayo fursadii loogo faa'iideysan lahaa xirfadaha kala duwan. Waxaanu doonaynaa in an helno xal wax looga qabto dhibaatada shaqsiga hadba baahida jirta.

- Waxaan tusaale ahaan muruqgelinaa ururrada, oona siina fursado ay ku adeegsadaan shabaka xiriirkooda, taaso u suurtagelineeyso sidii ragga iyo dumarka shisheeyaha ay lug ugu yeelan lahaayeen suuqa shaqada.
- Waxaa la sii hagaajin doona barasha luqada iswiidishka, waxan hab sidii hore ka wanaagsan loola qabsiin doona qofka barashada ay khuseeyso, taaso qofkaas u suurtagelineeyso innuu dhaqsi luqada ku barto, una ku shaqaysto. Imminka waxaa lagu dhaqaaqay hawllo lagu horumariyo karti-xirfadeedka macallimiinta luqada iswiidishka ee loogu talaggalay shisheeyaha, waxtarkoodana laga dhigo sidii la doonaayi.
- Waxaa imminka la helaa fursado cusub ee lagu qiimeeyo laguna dhamaystiro waxbarashada shisheeyaha.
- Barnaamij cusub ee ka kooban tobban qoddob ayee dowladda xisbiga socialdemokratiga go'aamisay in la bixiyo hal biljan karoon ah oo dheeraad ah, lacagtaas waxaa loogu talaggalay in lagu kordhiyo fursada shaqo helida ee dadyowga dibeda ku dhashay.

Waxaa la xoojoyay hawlaha loogula dagaalammo kala soocida
Weli waxaa jiraan iska naceeb aanan saldhig lahayn, waxaana weli dhacda falal kala socid ku salaysan, kuwaaslo loola kaco dadyoow dalal kale u dhasheen, diiman iyo dhaqammo kale leh. Kala soocida waxay keenta in ummadda dhammaantood aysan helin isku xuquuq iyo isku fursad. Falalkaas waxay xaddayaan fursadda dumarka iyo ragga shisheeyaha ay ku soo geli lahaayeen suuqa shaqada iyo nolasha bulshada. Hab-dhaqanka xubnaha bulshada waa in wax laga beddela, waxaa loo baahan yahay sharciyo cusub oo loogu hortago dhammaan falalka kala socida.

Dowladda xisbiga socialdemokratiga waxay sidaas awgeed ku dhaqaaqday sharciyo cusub oo xoog loogula dagaalammo kala soocida, waxayna wakiilka ammuuraha kala sooca “Diskrimineringsombudsmannen, DO”, siisay karti hawlgal oo dheeraad ah.

Horumarinta xaafadaha liita
Waxaanu leenahay siyaasad u gaar ah xaafadaha liita. Haddii aanu nahay xisbiga socialdemokratiga, waa wax dabiici ah in aanu mudnaanta koowaad lagu wajihiyo goobaha muruqgelinta aad loogu baahan yahay. Sida dugsiyada ay dhigtaan ardayo aanan gaarin ujeedada waxbarashada. Waxaanu doonaynaa in 100-ka dugsiyo ee dalka ugu liito, ay helaan muruqgelinta qaranka, sidii ay suurtagal u noqoto qorida macalimiin iyo shaqaalaha dugsiyada, kuwaaso tiradooda gaareeyso 1 000 qof. Waxaan muruqgelin karnaa qalabyaga waxbarashada casriga ah, dugsiyadaas oo ku yaalo degmooyinka ay u badan yihiin dhallinyarada waalidiintooda shisheeyaha ah.

Wax ku bediladeeda
Siyaasadayda oo ah in ummadda dhammaanood ay lee yihiin isku xuquuq, waajibaad iyo fursad, iyadoo aanan la tixgelin jinsiyadooda, diintooda ama dhaqamada ay ka yimaadeen, waxaa ka soo horjeeda siyaasadda isbahaysiga midigta ee xisbiga moderaterna u hogaamiyo. Waxay doonayaan in kharashka muruqgelinta ee loogu talaggalay siyaasadda suuqa shaqada ay ka jaraan lacag dhan sideed biljan karoon. Waa arrin aad u adag in la fahmo sida siyaadaaso kale ay sare ugu qaadi lahayd fursada shaqo helida ee dadyoowga asalkooda shisheeyaha ah. Markii qofku u san helin fursadda uu iskiisa dhaqaale ahaan isugu filnaado,

waxaa abuurmaayo gooni u bixid. Isla markaas wuxuu xisbiga moderateratiga doonayaa innuu suurtageliyo suuq shaqo ee lagu shaqeeyo mushaharro hooseeyo. Ummadda waxaa lagu dirqin doona in shaqooyinka mushaharka hooseeya qabtaan, iyadoo aanan la tixgelin awood xirfadeedkiisa ama waxbarashadiisa. Dhibaatada siyaasadaaso kale waxay tahay in, qofku u dhaqamaysto shaqooyinka musharka hooseeya, xitaa haddi ay lee yihiin aqoon heer sare ah.

Dalka Iswiidan anagu aanu maamuli doono waa loo dhan yahay, adigu-se dalkee dooratay?